# *Af Soomaaligu Khatar Ma Ku Jiraa?*

## Falanqeynta Walaaca Faafay iyo Wejiyada Dhabta ah

**Dr. Maxamed Xirsi**

June, 2024

COPYRIGHT © 2024 by ISIR Institute

**COPYRIGHT © 2024** *by ISIR Institute*

All rights reserved.

No part of this publication may be reprinted or reproduced or utilized in any form or by any electronic, mechanical or other means, without permission in writing from the publishers.

**ISIR INSTITUTE**

**Off Airport Road, Masallaha Hargeisa**

**SOMALILAND**

Phone: +252 63 6226667

www.isirinstitute.com | info@isirinsitute.org |

@ISIRInstitute @ISIRinsitute @ISIRinsitute @isirinsitute

## *The Institute for Strategic Insights and Research (ISIR)*

**Ku saabsan Machadka ISIR**

Machadka ISIR ee Daraasaadka Istiraatiijiyadda iyo Cilmi-baadhista waa xarun cilmi-baadhis oo madax-bannaan, fadhigeeduna yahay Hargeisa, Somaliland. Machadka ISIR waxa uu ka shaqeeyaa horumarinta daraasaadka khuseeya siyaasadda iyo sidii loo hirgelin lahaa hay'ado dawli ah oo horseeda isbedel waara. Daraasaadka Machadka ISIR waxa ay diiradda saaraan dhinacyada nabadda iyo amniga, maamulka iyo dimuqraadiyada, iyo isbedelka cimilada.

# Tusmooyinka


**Dulucda** .......... iii

**Hordhac** .......... 1

**Af Soomaaliga** .......... 1

**Dabargo'a Afafka** .......... 3

**Afafka Nugul ama Khatarta ku Jira** .......... 4

**Sababaha Keena Dabargo'a Af** .......... 5

**Xaaladda Af Soomaaliga** .......... 5

**Ma Jirtaa Khatar Foodsaaraysa Af Soomaaliga?** .......... 6

**Maxaa lagu Furdaamin Karaa Khatarahaas?** .......... 7

**Gunaanad** .......... 8

**Ku saabsan Qoraaga** .......... 9

**Xigasho:** .......... 9

**Tixraacyada** .......... 10

# Dulucda

Af Soomaaligu waxa uu sameynayaa korriin iyo hagaas isbarbarsocda. Boqol-laal sannadood ayaa uu soo ahaa af ka xidhan foofka ilbaxnimada oo ay ugu muhiimsan tahay farta iyo qoraalku, sababo badan awgeed. Ha se ahaato e, kontonkii sannadood ee ugu dambeeyay waxa uu yeeshay far qoraal, taas oo suuragalisay in ay faafaan qoraalka iyo akhriska dhigaallo af Soomaali ku qora-ni. Waxa se horumarkaas ku lammaan, hanaqaad la'aan ka haysa hab-qoraalka iyo naxwaha oo aanu weli saldhigin, ama aanu lahayn halbeegyo saxartiran oo uu tixraaco.

Waxa kale oo af Soomaaliga khatar ku haya isufuranka dunida, tiknoolojiyadda iyo habka waxbarashada oo ka qaadaya qiimihii uu dadkiisa u lahaa ama ay u hayeen. In kasta oo uu arrintan dambe kala siman yahay afaf badan oo dunida ka jira, haddana waxa ay Soomaalida ku abuurtay walaac ah in afkii sii lumayo. Ereyada soogalootiga ah ee afka ku soo kordhayaana dadmadaas waa ay sii badiyeen.

Si kastaba ha ahaato e, walaacaasi, inta badan, waa mid nafsi ah ama qabka la xidhiidha oo aan abbaarin boogta dhabta ah ee fiirada gaarka ah mudan.

`

***Erayada furaha ah:*** **Af Soomaali, far, nuglaan, erayo dool ah, dabargo'**


COPYRIGHT © 2024 by ISIR Institute

# Hordhac

Walaaca haybta iyo jiritaanka ee soo foodsaara bulsho, waxa uu inta badan ku wareegaa qeexayaasha haybtaas oo uu ka mid yahay afku. Soomaalidana in muddo ah waxa ku soo noqnoqonayey hadallo dayro ah oo ku saabsan mustaqbalka af Soomaaliga, kaas oo intiisa badan ka imanaya daneeyeyaasha afka iyo dhaqanka. Walaacani, sida badan, kuma qotomo aqoon iyo cilmibaadhis, waxa se uu ku dhisanyahay warar shaacbaxay oo ku lammaan waxbarashada, magaalowga, tiknoolojiyada, iyo Soomaalida dibedaha u dhooftay oo la soo noqday ereyo qalaad oo ka dhex muuqda adeegsiga afka. Dadka isu xilqaama dhawrista hiddaha ayaana ugu badan faafinta walaacyadan.

Waxa walaacan, sida badan, loo cuskadaa in erayo badan oo af Soomaali ahi ay dabargo'een, ama aanay facyowga cusub ee Soomaalidu aqoon u lahayn. Waxa iyaguna jira erayo badan oo dool ah, kuwaas oo isugu jira kuwo ku milmay af Soomaaliga, iyo kuwo aan haybtoodu beddelmin, haddana loogu dhex adeegsado sababo la xidhiidha waxbarashada, nolosha magaalada iyo tiknoolojiyada.

Qoraalkan waxa aan ku falanqeynaynaa, waxyaabaha ka jiri kara khataraha la sheego, wejiyada ay leeyihiin, iyo waxii laga qaban karo. Innaga oo ku eegeynna sida ay afafku u hagaasaan, ama u dabargo'aan, iyo waxyaabaha caawiya ee ku xusan cilmibaadhisaha laga sameeyay afafka khatarta ku jira. Waxa aan eegi doonaa xaaladda uu af Soomaaligu ku sugan yahay, marka la eego afafka adduunka, waxa uu afafkaas la qabo iyo nuglaanta u gaarka ah.

# Af Soomaaliga

Afka iyo ummaddiisu waa isku-sidkaneyaal aan la kala saari karin. Afku waa weelka hiddaha iyo dhaqanka, sooyaalka iyo fikirka bulsho ee baadi socda u ah, waana sababta ay ummaduhu u qaataan, inta badan, magaca afkooda ama afkoodu uu u qaato magaca ummadda ku hadasha – waa haybta e. Iyada oo ay afka iyo ummaddiisu sidaas isu leeyihiin, ama isugu sidkan yihiin, haddana isirka af Sooomaaliga looguma muransana sida loogu muransan yahay isirka Soomaalida lafteeda.


COPYRIGHT © 2024 by ISIR Institute

Sannadkii 1972 kii ayaa Jamhuuriyaddii Soomaalidu ay ku biirtay Ururka Jaamicadda Carabta. Waxa ay ahayd, aminsanaanta ku dhex faafsan beelaha Soomaalida ee ah in isirkoodu uu ka soo jeedo Carab oo loo beddelay waaqic siyaasadeed.

Asalka Soomaalidu waa arrin muran badan oo ay isku diiddan yihiin daraasadaha isirrada, iyo sheeko-gurida qabiilladu. Lama dhayalsan karo kaalinta ay diinta Islaamku ku leedahay, qaadashada Soomaalida ee haybta Carabnimo. Waa wax la fahmi karo in qabiilooyinku ay diinta u dhigan karaan wejiga 'tolnimada', iyaga oo fahamka culus ee diinta ku beddelanaya fahanka dhaqan ee 'in ay shakhsiyadda astaanta u ah diinta – waa Nabiga e, ay nasab wadaagaan' si ay diinta u waafajiyaan hab fikirkooda qabiiliga ah.

Waxa kale oo baadhitaan gaar ah u baahan, kaalinta ay arrintan ku leeyihiin carabtii ugu horreysay ee timid Geeska Afrika, kana dhistay saldanooyinkii Islaamiga ahaa, iyo halka ay ku dambeeyeen. Tusaale ahaan, ma laga yaabaa in tiro badan oo Carabtaas ka mid ahi ay ku milantay qoomiyadaha gobolka sida Soomaalida, sidaasna uu dhab ku yahay jiritaanka isirka Carbeed ee ay sheegan karaan Soomaalida badhkeed? Weyddiintan nuxurkeedu ma aha in Soomaalidu noqon karto Carab, balse waa in uu jiri karo dhiig Carbeed oo ku milmay. Waa arrin u baahan baadhis gaar ah iyo qoraal kale.

Muranka ku saabsan isirka Soomaalidu, kama jiro isirka afkooda. Aqoonyahannada cilmi-afeedku (linguistics) kuma kala baydhsana, in af Soomaaliga loogu abtiriyo afafka Afro-Eeshiyaanka oo uu ka sii yahay laanta Kushitiga oo ay kaga baydhaan afafka Saamiga ahi (sida Carabiga, Cibriga, Amxaariga, Tigreega ...), kana sii yahay Soomaali oo ka sii farcamay Kushitiga Bari. Waxa ay bahwadaag yihiin afafka Oromada, Cafarta, Saahuuga, Biijaha, Siidaamo iyo kuwo kale. Afafkani waxa ay soo abuurmeen, kala farcameen oo ay hayb kala yeesheen kumannaan sannadood ka hor.

Af Soomaaligu, in kaste oo uu yahay jirrid weyn oo ka mid ah afafkaas Kushitiga oo uu yahay afka koobaad ee dhulka ugu ballaadhan lagaga hadlo, iyo afka labaad, afafka kushitiga ee ay tirada ugu badani ku hadasho, haddana ma uu lahayn far lagu qoro oo dhigaal loogu kaydiyo. Waa ay jiri jireen, mar kaste, dadaallo shakhsi ahi, haddana 1972 kii ayaa markii ugu horreysay la isla qaatay far lagu qoro Soomaaliga oo ah midda uu qoraalkeennani ku xardhan yahay. Waxa ay la qabtaa


COPYRIGHT © 2024 by ISIR Institute

afafka ay bahwadaagta yihiin, waxaana u sabab ah dadyowga afafkan leh oo aan degalkoodan ka curin ilbaxnimooyin hanaqaaday, inta la garanayo taariikhda.

Bariga Afrika waxa muddo aad u dheer saameyn ilbaxnimo ku lahaa, dhaqannada Saamiga ah oo ku lammaan diimaha Kiristaanka iyo Islaamka. Labadaas diimood markii ay dhulkan soo gaadheen, waxa ay abuureen in afafka Saamiga ah oo ay ku qornaayeen ay mudnaan ilbaxnimo ka yeesheen, afafkii deegaanka oo ah kuwa Kushitiga. In kaste oo afka Amxaariga iyo farta Jicistu ay muddo aad u dheer deegaan ku ahaayeen gobolka, haddana waa af Saami ah oo ku awoodeystay diinta Kiristaanka, iyo awooddii maamul ee Xabashida oo isirkoodu Saami yahay. Carabiguna, in kaste oo aanu Muslimiinta Bariga Afrika u noqon af hadal iyo mid qoraal oo rasmi ah, haddana waxa uu noqday afka waxbarashada diiniga ah iyo farta ku sidkan akhriska iyo qoraalka dadka waxbartay "wadaadka". Afafkani, iyaga oo kaashanaya awoodaha mooraalka iyo kuwa maamulka, waxa ay ka qaybqaateen in afafka degalka, oo uu Soomaaligu ka mid yahay, aanay horumar ka sameyn dhinacyada qoraalka iyo kaydinta.

## *Dabargo'a Afafka*

Dabargo'a afafku ma aha wax cusub. Intii ay taariikhdu diiwaangashanayd iyo inta la male-awaali karaba, waxa dabargo'ayay afaf iyo dhaqannadii ku duugnaa. Dhimashada afafku waa hannaan aan dhakhso u dhicin e, qaab isbiirsi ah ama aayar-aayar ah u dhaca, kaas oo qaata facyow dhawr ah oo ku suntan hoobad joogto ah. Afku in uu dhinto waxa ka horreysa in uu bukoodo, sii liidmo, ka dibna awoodi waayo in uu adeeggii afka bixiyo; in lagu wada xidhiidho, in uu dhaqanka iyo mandiqa bulshadiisa xambaaro, iyo in uu sameeyo korriin la socda fikirka iyo aqoonta bulshada. Sida uu qabo K. David Harrison, aqoonyahan cilmiga afafka ahi, afku inta aanu dhiman waxa uu maraa marxalado jirro oo u kala horreeya sidan:

- Marxaladda ay ubadku afkooda hooyo kaga hadlaan, keliya, guriga ama kula hadlaan xigtada,
- Marxaladda ubadku aanay baran afkooda hooyo ama aanay waxa ku baran afka, iyo
- Marxaladda ugu dambeysa oo uu afku noqdo mid ay, keliya, ku hadlaan waayeelka oo ah kolka uu afkaasi saaran yahay sariirta dhimashada (Atifnigar, 2021).

Waxa uu af dhintaa, kolka ay dhimato


COPYRIGHT © 2024 by ISIR Institute

ama la waayo cid ku hadasha, ama uu ka baxo in uu noqdo af ay cidi u barato af-hooyo ahaan (Isa, Ahmed , & Grema, 2014). Tusaale ahaan, Afka Laatiinku waxa uu ka mid yahay afafka dabargo'ay, sababta oo ah ma jirto cid u barata af-hooyo ahaan mana jirto ummad ku hadasha oo uu af u yahay. Waxa jira afaf u badbaaday taariikh ahaan oo laga turjunto qoraallo, ama faro ay ku diiwaangashan yihiin. Afaf kalana raadkoodiiba waa uu tirmay, maaddaama oo aanay ka tagin wax dhigaal ah oo wax lagaga kaydiyay.

## *Afafka Nugul ama Khatarta ku Jira*

Sida aynnu kor ku xusnay, afku waa uu bukoodaa, inta aanu dhiman. Heerka bukaannimo ee uu marayo ayaa muujiya in uu yahay af nugul ama khatar ku jira, una dhexeyn kara af khatar ku jira iyo mid sakaraad ah. Arrimo dhawr ah ayaa laga eegi karaa heerka nugeylka ee afkaas, kuwaas oo kala ah sidan soo socota (Sallabank & Austin , 2022):

- Adeegsiga heerka qoys oo muujiya, in ay jiraan facyow baranaya afkaas kuna barbaaraya.
- Tirada dadka ku hadla ee uu yahay afka keliya ee ay adeegsadaan, ama dhaqan u yahay oo muujinaysa in uu yahay af dhaqan oo xusuus u haya dad jira.
- Tirada ay dadka ku hadlaa ka yihiin wadarta bulshada guud, taas oo muujisa ilaa heerka ay dadka ku hadlaa sii xejisan karaan ama milmi karaan.
- Halka uu afkaasi kaga jiro agabka akhriska, waxbarashada iyo warbaahinta oo muujinaysa in uu yahay af la barabixinayo, iyo in uu yahay af la koraya aqoonta.
- Halka uu afku kaga jiro afafka rasmiga ah ee maamulka, awoodda iyo hay'adaha adeegsada afka.

Af kaste oo ku liita qodobbada kor ku xusani, waa af nugul ama khatar ugu jira in uu dabargo'o, haddii aanay isbeddelin ama wax laga qaban duruufaha nugleynaya.

In ka badan kala badh afafka dunida (50%) ayaa hadda ku jira khatar, una nugul in ay dabargo'aan (Bromham, 2021). Waxa ugu weyn ee ugu wacan nuglaantaasi waa, kala-duwanaantii afafkan iyo dhaqannadii ay ku dhisnaayeen oo sii lumaya, isufuranka dunida ee faafaya awgeed. In ay afafka muggaas le'egi dabargo'ayaan waxa ay ka dhigan tahay, in afafka dunida ka jira badankoodu ay yihiin kuwo ay ku hadlaan dad aad u koobani. Si kale, keliya 4% ka mid ah afafka dunida ka jira ayaa ay ku hadlaan 96% dadka dunida ku nooli (Crystal, 2000).


COPYRIGHT © 2024 by ISIR Institute
Dr. Maxamed Xirsi, June 2024

## Sababaha Keena Dabargo'a Af

Sababo door ah ayaa kaalin weyn ka ciyaara in uu afku jirrado ama dhinto, waxa ugu muhiimsan oo ka mid ah siyaabaha iyo sababaha uu af u dhiman karo;

- Milan afeed oo kaga yimaadda af kale oo dool ah, kagana tun roon dhinacyada aqoonta ku diiwaangashan,
- Ilbaxnimada dhaqan iyo diinta af kale oo ay qabatimaan dadka leh afka dhimanayaa.
- Barakaca dadka, iyo in afkaas dadkiisu ay ku filqamaan dunida oo ay lumiyaan wax badan oo ka mid ah madhaxii afkooda.

Si kale, sababaha nugleeya afka ee aynnu kor ku xusnay, ayaa duruufo kala duwani ay xoojin karaan, taasina ay horseedaysaa in afku uu dhinto ama dabargo'o.

## Xaaladda Af Soomaaliga

In kaste oo aanu jirin tirokoob la isku halleyn karo oo lagu sameeyay dadka Soomaalida ah, ama af Soomaaliga ugu hadla af-hooyo ahaan, haddana af Soomaaligu waxa uu ka mid yahay afafka dunida ee ay tobaneeyo milyan ku hadlaan. Waxa ay ka dhigan tahay in uu ka mid yahay 100 ka af ee ugu horreeya dunida, marka laga eego tirada dadka ku hadla. Waxa kale oo uu soo galayaa tobanka af ee ugu dadka badan afafka dhaladka ku ah Afrika.

Haddii aan ku eegno halbeegyada afafka nugul ama khatarta ku jira, af Soomaaligu waxa uu leeyahay ummad ugu hadasha af-hooyo ahaan oo malaayiin ah, si joogto ah ayaa ay ugu dhashaan facyow cusub oo qoyska kaga dhex ababaa. Waxa uu dhaqan iyo xusuus wadareed u xambaarsan yahay ummad ballaadhan oo af ahaan ugu fikirta, waxa intaas dheer, in af Soomaaligu uu yahay af rasmi ah oo dawladeed, in kaste oo dawladaha Soomaalidu aanay wax badan ku darsan hodminta afka iyo tayeyntiisa. Sida oo kale, in kaste oo aan la tayeyn lana kobcin, af Soomaaligu waa af waxbarasho oo ay ku qoran yihiin maaddooyin aqooneed, kaas oo ilaa heer leh sees, lana sii kobcin karo.

Dhinacyadaas marka la eego, af Soomaaligu waa af nool, firfircoon, welina hodan ku ah xusuus wadareedda dhaqanka, fikirka, suugaanta iyo fanka. Af Soomaaligu waxa uu mud-


COPYRIGHT © 2024 by ISIR Institute

dooyinkan dambe sameynayaa korriin aan nidaamsanayn oo ah dhanka qoraalka, faafinta buugaagta iyo warbaahinta.

Sidaas oo ay tahay, afartankii sannadood ee ugu dambeeyay waxa ay Soomaalidu u kala qaxeen daafaha dunida, waxa ay yeesheen facyow badan oo aanu af Soomaaligu u ahayn afka koobaad ee ay ku hadlaan, haddiiba ay ku hadlaan. Waxa kordhay dadka wax ku bartay afaf shisheeye oo in badan u noqday afka ay aqoon ahaan ugu fikiraan, ama ku shaqeeyaan.

Isufuranka dunida, tiknoolojiyada iyo xogta ku faafta baraha bulshada, iyo awoodda dhaqan-dhaqaale ee afafka leh fursadaha faafitaan, sida Ingiriisida, ayaa iyaguna, haybad-tiraya afaf badan oo dunida lagaga hadlo, af Soomaaliguna kama reebbana saameyntaas.

## *Ma Jirtaa Khatar Foodsaaraysa Af Soomaaliga?*

Dadka ka dayriya aayeha af Soomaaligu, waxa ay u badan yihiin suugaanleyda iyo qaybaha bulshada ee dhaqanka ku dheggen. Waxa ugu badan ee ay caddeymaha u soo qaataanna waa, afafka shisheeye ee ku milmaya Soomaaliga iyo erayo hore oo dhimanaya ama dhintayba. Arrintaasi waa mid jirta. Ha se ahaato e, wejiyo dhawr ah ayaa laga eegi karaa;

- In erayo uu af leeyahay ay dhintaan, iyo in uu af dhinto waa ay kala duwan yihiin, iskumana sidkana mar kaste. Sababta oo ah, in badan waxa ay erayo u dhiman karaan in ay adeegsiga ka baxeen ama ujeeddadii ay u jiraan aanay dhaqan ahaan iyo xusuus ahaanba jirin, ama ay beddeleen erayo kale oo isla afka ka dhashay. Af Soomaaliga iyo afafka dunida oo dhanba waa ay maraan qolofdhacsi, iscusboonaysiin iyo horumarka erayada iyo ujeedooyinka loo isticmaalo. Sidaa awgeed, in ay keliya erayo gaar ahi dabargo'een kama dhigna, in ay qasab tahay afkii oo dabargo'aya. Walaacaas waxa inta badan qabi kara qof ah arki-jiray-doon. (In wixii hore u jiray aanay is beddelin)
- Erayada doolka ahi mar kaste halis kuma aha afka, isu gudubka ilbaxnimooyinka iyo afafku waa soojireen, intii ay taariikhdu jirtay. Erayo ayaa ay kala ergistaan afafku, marar badanna waa ay ku hodmaan. Ma jiro, dunida, af ka madhan erayo dool ah oo deegaan noqday. Erayga doolka ahi, haddii uu galo adeegsiga maalinle ee nolosha, iyada oo aan loo dareemayn in uu shisheeye yahay – uu shisheeye-baxo, waxa uu ka mid noqdaa afka uu ku soo biiray.


COPYRIGHT © 2024 by ISIR Institute
Dr. Maxamed Xirsi, June 2024

> Ergiska erayada doolka ah, waxa inta badan diidmo iyo didmo ka qaba dadka jecel badhax la'aanta isir iyo afeed, arrintaas oo ah mid aan waaqica ummadaha ka jirin ee ah badhaxtirnaan khiyaali ah.

Walaaca garta ah ee af Soomaaliga laga qabi karaa waa uu ku muhiimsan yahay, erayo nolosha miyi wax ka tarayey, oo ay lumisay nolosha magaaladu, ama erayo ku xidhiidhsan farsamooyinka cusub iyo agabka soo dhoofay, ka dibna deegaanoobay.

Khataraha af Soomaaliga nugleynaya, in badan oo ka mid ahna uu ula simanyahay afaf badan oo dunida ka jira, waxa ka mid ah in aanu sameynayn korrin dhanka aqoonta iyo eray-bixinta farsamada ah. Butaaca ilbaxnimada reer Galbeed ee uu seeska u yahay af Ingiriisidu, iyada oo ay fududeynayso awoodda dhaqan-dhaqaale iyo siyaasadeed, waxa ay dunida oo dhan ka abuureysaa dareen nafsadeed oo ah, in afaf degaleedku aanay xambaari karin aqoon, fududeynna karin war-isgaadhsiinta dunida.

In af Soomaaligu aanu waqtigan si cuddoon u xambaari karin aqoonta waxbarashada, xirfadaha shaqo iyo eraybixinaha aragtiyaha aqooneysan, waxa ay dhiirrigalinaysaa in aan loo arkin af naqweed (elite language), in ay dadkiisu quudhsadaan, iyo in aan loo hawlgalin kobcintiisa iyo taabbagalinta eraybixinno loo adeegsado aqoonta, adeegsiga xirfadaha, iyo shaqooyinka hay'daha dawladda iyo kuwa aan dawliga ahaynba. Arrintaas ayaa ah khatarta dhabta ah ee soo foodsaartay af Soomaaliga.

## *Maxaa lagu Furdaamin Karaa Khatarahaas?*

Af Soomaaligu waa af dhisan, nool, weli xambaarsan xusuus wadareed iyo dhaqan, lehna malaayiin dad ah oo uu u yahay af-hooyo, iyo mid rasmi ah. Sidaas oo ay tahay, waxa hubaal ah in uu waajahayo culeysyada aynnu kor ku tilmaannay. In uu af Soomaaligu u wiiqmo culeysyadaas waxa lagu baajin karaa, in laga dhiso lagana horumariyo dhanka rasmiyeynta iyo aqooneynta, taas oo lagu gaadhi karo:

- Dhammeystirka habqoraalka erayada oo rasmi ah, iyo taabbagalinta naxwaha uu ku dhismo hadalku. Ilaa hadda waxa aan jirin hab la isku wada raacsan yahay oo ku saabsan sida loo qorayo erayo iyo tibaaxo badan oo Soomaali ah, arrintaas oo wiiqeysa in si hufan loogu adeegsado qaab rasmi ah.
- Dhiirigalinta iyo hirgalinta eraybixinno aqooneed iyo kuwo farsamo oo buuxin kara ujeedooyinka, aqoonta iyo xirfadaha, taas oo af


COPYRIGHT © 2024 by ISIR Institute
Dr. Maxamed Xirsi, June 2024

Soomaaligu uu weli ku liito.

- Xoojinta adeegsiga rasmiga ah ee maamulka dawladda iyo xidhiidhadiisa gudaha.
- In jaamicadaha iyo macaahidda waxbarasho oo dhami ay ka qaybqaataan korinta aqooneed ee af Soomaaliga, iyo in af Soomaaligu uu qayb ka noqdo maaddooyinka joogtada u raacsan waxbarashada ardayda.
- Xoojinta xusuus wadareedka bulsho ee uu weelka u yahay af Soomaaaligu, sida suugaanta, dhaqanka, iyo taariikhda Soomaalida.

# *Gunaanad*

Af Soomaaligu waa uu nuglaanayaa, haddii aanu la jaanqaadin nolosha ay Soomaalidu ku jirto, maanta. Walaaca shaacsan ee arrintan ku saabsani, inta badan, ma aha mid ku saabsan xaqiiqada nuglaanta jirta. Waxa loo baroordiiqaa erayo u dhintay si dabiici ah, waxaana laga dayriyaa erayo laga soo ergisanayo afaf kale oo ku yimid isu gudubka ilbaxnimooyinka, iyo dhaqannada, arrintaasi oo soojireen ku ah sooyaalka afafka iyo dhaqannada. Metalan, eraygan 'metalan' hadda waa af Soomaali, se asalkiisu waa Carabi beri hore soo galay afka Soomaaliga. Waxa weli lala adeegsadaa erayga la macneha ah ee 'tusaale ahaan'. Ergiska noocan ahi, waxa uu hodmiyaa afka oo waa eray afka ku soo biiray, una hayb-beddeshay e, ma aha eray hayb-beddelay cidda ku hadlaysa.

Halistu waxa ay ka imanaysaa erayada, iyaga oo aan dhalanrogmin, barabixinaya erayo dhalad ah, loona doorbidayo in ay aqoon ahaan, ilbaxnimo ahaan iyo farsamo ahaanba ka horumarsan yihiin af Soomaaliga, kana sarreeyaan. Markan, erayga doolka ahi waxa uu la imanayaa summaddiisii iyo sawraciisii oo sarreyn u ah. Horumarka tiknoolojiyada, iyo saameynta dhaqan-dhaqaale iyo siyaasadeed ee dalal gaar ah, ayaa dunida oo dhan mudnaan gaar ah siinaya afaf gaar ah, sida Af Ingiriisida. Si arrintaas loo furdaamiyo, ummadaha adduunku waxa ay u baahan yihiin in ay xoojiyaan dhaqannadooda, xusuustooda taariikheed iyo suugaanta ku kaydsan afafkooda, si loo ilaaliyo kala jaad duwanaanta dunida oo u taagan hodannimada dhaqan ee aadanha. Soomaalidana waxa la gudboon intaas oo kale, si uu afkoodu u badbaado, waa in ay ka dhisaan dhinacyada tayeynta qoraalka, naxwaha, adeegsiga afka iyo kaydkiisa sooyaal.


COPYRIGHT © 2024 by ISIR Institute
Dr. Maxamed Xirsi, June 2024

## *Ku saabsan Qoraaga*

**Dr. Maxamed Xirsi** waa Cilmi-baadhe ka tirsan Machadka ISIR. Waxaa lagu bartay dadaalkiisa ku saabsan caafimaadka bulshada, isaga oo daabacay maqaalal badan oo ku saabsan ka hortagga cudurrada iyo kor u qaadista caafimaadka.

Marka laga tago takhasuskiisa caafimaadka, Dr. Xirsi waxa uu qoraallo ka sameeyaa arrimaha siyaasadda, bulshada iyo taariikhda. Sidoo kale, waxa uu aqoon u leeyahay arrimaha dhaqan bulsheedka, afka iyo suugaanta. Waxa uu turjumay buugaag iyo qoraallo badan oo aqooneed oo ku qoran afafka Carabiga iyo Ingiriisida. Aragtiyihiisa dhaqameed iyo luqadeed waxa ay kor u qaadaan cilmi-baadhistiisa iyo qoraaladiisa.

## *Xigasho:*

**Dr. Maxamed Xirsi** (April, 2024) Af Soomaaligu Khatar Ma Ku Jiraa? Falanqeynta Walaaca Faafay iyo Wejiyada Dhabta ah. *Waxaa lagu daabacay, Machadka Istaraatiijiyadda Aragtida iyo Cilmi-baadhista (ISIR)*


COPYRIGHT © 2024 by ISIR Institute
Dr. Maxamed Xirsi, June 2024

# Tixraacyada


Atifnigar, H. (2021). Exploring the Causes of Language Death: A Review Paper Teaching Assistant Teaching Assistant. *International Journal of Arts and Social Science* , 3.

Isa, B. Z., Ahmed , H. K., & Grema, Y. (2014). Language Death and Endangered Languages. *IOSR Journal Of Humanities And Social Science (IOSR-JHSS)*, 46.

Sallabank, J., & Austin , P. K. (2022). Endangered Languages. *Research Gate*.

Bromham, L. D. (2021). Global predictors of language endangerment and the future of linguistic diversity . *The Nature*.

Crystal, D. (2000). *Language Death.* Cambrigde: Cambrigde University Press .




COPYRIGHT © 2024 by ISIR Institute
Dr. Maxamed Xirsi, June 2024

COPYRIGHT © 2024 by ISIR Institute

# *Af Soomaaligu Khatar Ma Ku Jiraa?*

## Falanqeynta Walaaca Faafay iyo Wejiyada Dhabta ah

**Dr. Maxamed Xirsi**

June, 2024

**ISIR INSTITUTE:**

Off Airport Road, Behind the Adam's Inn
Hargeisa, Somaliland
T: 252-(0)63-4420-147